

MACLUUMAADKA BUKAAN JIIFKA

Kooxda Levetiracetam Actavis Milanka dareeraha afka laga qaato

Dawaynta qalalka

! Xog muhiim ah!

La xidhiidh dhakhtarkaaga haddii aad ogsoonato:

- koboca ilmahaaga oo hoos u dhacaya ama baaluqida oo ku kobocda hab aan la filayn
- suuxdinta oo sii noqonayda mid aad u halis ah (tusaale ahaan kordhinaysa tirada)

Dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis waxa uu ka koobanyahay methyl parahydroxybenzoate (E218) iyo propyl parahydroxybenzoate (E216) kuwaas oo sababi kara jawaab celin xasaasiyadeed (suuragala ahaan la daahiyo). Dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis sidoo kale waxa uu ka koobanyahay maltitol. Haddii uu dhakhtarkaagu kuu sheegay in aad tahay/aanu ilmahaagu awood u lahayn in uu u adkaysto sonkorta qaarkeed, la xidhiidh dhakhtarkaaga ka hor inta aanad qaadin daawayntan.

Wixii xog dheeraada ah, eeg xogta bukaan jiifka warqada macluumaadka ee ku dhex jirta xidhmada.

Sida loo isticmaalo dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis

Had iyo jeer u qaado dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis sida uu dhakhtarkaagu ku faro. Haddii aanad hubin, waa in aad raadisaa tallada dhakhtarkaaga ama shaqaalaha farmasiigaaga. Daawayntu caadi ahaan waxay ku bilaabantaa dawo qaadasho hoosaysa taas oo ka dib aayar aayar loo kordhiyo. Waxay qaadan kartaa muddo in la helo dawo qaadashada adiga kugu habboon.

Milankan waxaa lagu badhxi karaa koob biyo ah ama dhalada quudinta.

Intee in leeg ayay daawayntu soconaysaa?


Dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis waxaa loo isticmaalaa daawaynta xiliga dheer. Adiga/ilmahaagu waa in aad sii wadaa daawaynta ilaa inta dhakhtarkaagu kuu sheego.

Ha joojin daawaynta addoon raadin waanada dhakhtarkaaga, maxaayeelay tani waxa kordhin kartaa tirada suuxdinta. Haddii uu dhakhtarkaagu joojiyo daawaynta, waxaad heli doontaa tilmaamaha sida aayar aayar loo joojiyo daawayntaada dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis.



Maxaan sameeyaa haddii aan qaatay/ilmahaygu qaatay wax badan dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis?

Saamaynaha suuragalka ah ee wax badan oo xad dhaaf ah ka qaadashada dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis waa lulo, dareen kacsanaan, dagaalan, feejignaanta oo yaraata, joogsiga neefsashada iyo koomo. La xidhiidh dhakhtarkaaga haddii aad qaadatay/ilmahaagu qaatay dareer ka badan inta dhakhtarku qoray. Dhakhtarkaagu waxa uu go'aamin doonaadaawaynta ugu wanaagsan ee dawo xad dhaaf ah oo la qaatay.





MACLUUMAADKA BUKAAN JIIFKA

Kooxda Levetiracetam Actavis Milanka dareeraha afka laga qaato

Dawaynta qalalka

Maxaan samayn doonaa haddii aan iloobo/ilmahaygu iloobo in uu qaato dawada?

La xidhiidh dhakhtarkaaga/ka ilmahaaga haddii aad seegtay mid ama ka badan oo dawo qaadasho. Labba goor ha qaadan si aad ugu magdhowdo dawo qaadasho la ilaabay.



Waa maxay saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada ee aadka loo yaqaanaa?

Sida dhammaan daawaynta oo dhan, daawayntani waxa a sababi kartaa saamayn dawo oo aaw anaagsanayn, lakiin maaha dadkoo dhan ee qaadanaya ay si lama huraan ah u dhibi doonto. "aadka loo yaqaano" saamaynta dawada aan wanaagsanayn, kuwaas oo ka dhaca in ka badan 1 qof 10 kiiba waa oolka sanko iyo/ama hunguriga, lulo iyo madax xanuun. Qaar ka mid aha saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada, sida lulada, daalka iyo dawakhaada, waxay noqon karaan qaar aad loo arko bilowga daawaynta ama marka dawo qaadashada la kordhiyo. Si kastaba ha ahaatee saamaynta dawada aa wanaagsanayn way yaraan doontaa wakhti ka dib.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saamaynta dawada ee aan wanaagsanaynwaxaa laga heli karaa warqadda macluumaadka ee ku jirta xidhmada.

Ma qaadan karaa anigu/ilmahaygu dawo kale?

Saamaynta dareeraha milanka afka laga qaato ee Levetiracetam Actavis waa uu beddelmi karaa oo waxaa jiri karta halis kordhaysa oo saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada haddii aad qaadato/ilmahaagu qaato dawo kale isla wakhti. Had iyo jeer u sheeg dhakhtarkaaga haddii aad adigu qaadaayso/ilmahaagu qaadanayso ama aad hadda ka horba qaadatay/uu qaatay dawo kale. Tan waxaa ka mid ah dawooyinka iyaddoon la qorin la qaato.



.....

.....

.....

.....

